

OGAYSIISKA SHAQO-KA-JOOJINTA

Xisaabtaada/akoonkaaga darawalka ee Lyft waxa loo joojiyey inaad jabisay Shuruudaha Adeegga ee Lyft. Fadlan ka tixraac iimeylkaaga taariikhda dhaqangalka iyo sababta shaqo-ka-joojinta.

Haddii shaqo-ka-joojintaada lagu sheego inay tahay mid kumeel gaar ah ama waraaqo maqan dartood loo joojiyey, fadlan dib-u-eeg Lyft Driver App si aad u ogaato wixii tallaabo u baahan inaad qaaddo wakhtigan.

Waxaad xaq u leedahay inaad isticmaasho wixii hore kuugu yaalay ee ah wakhtiga jirrada ee mushaharka lagu qaato inta xisaabtaadu/akoonkaagu ku jiro shaqo-ka-joojinta.

Si aad wax uga ogaato inaad rafcaan ka qaadato shaqo-ka-joojinta xisaabtaada, Xarunta Kheyraadka Daraawalada kala xiriira (Driver Resource Center, DRC) support@driversunionwa.org, 206-812-0829, ama 14675 Interurban Ave South, Suite 201, Tukwila, WA 98168, dib u eeg agabkiisa ku jira www.driversunionwa.org. Waxa dhici karta inaad xaq u leedahay inuu ku matalo DRC si aad rafcaan uga qaadato shaqo-ka-joojinta xisaabtaada.

Fadlan ogow, haddii aad oggolaatay Shuruudaha Adeegga Lyft iyo Heshiiska Dhexdhexaadinta ee halkaas ku qoran, waxa waajib ah inaad u gudbiso dhammaan cabashooyinka aad ka qabto Lyft, oo ay ku jiraan cabashooyinka la xiriira shaqo-ka-joojinta xisaabtaada, dhexdhexaadin aan laga bixi kari natiijadeeda oo kama dambays ah sida ku qoran Shuruudaha Adeegga Lyft. Fadlan fiiri www.lyft.com/terms si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.